# Maxay tahay ACCESS for ELLs?

## ACCESS for ELLs waa imtixaanka ku wanaagsanaanta luqadda Ingiriisiga qiyaasta ardayda xirfadahooda luqadda akaadeemiga Ingiriisiga.

Ilmahaaga waxaa loo aqoonsaday sida ELL, taas oo macnaheedu yahay ilmahaaga waxa uu lahaan karaa tilmaanta ku qoran Ingiriisiga, marka lagu daro qaadashada fasalada. ELLs waxay qaadaa imtixaanka ku wanaagsanaanta luqadda Ingiriisiga sanad kasta.

Imtixaamidu waxay ka caawisaa macalimiinta inay fahmaan haddii ardaydu ay qaadatay xirfadaha luqadda ay u baahnaayeen si ay si buuxda uga qayb galaan gudaha fasalka. Macalimiinta ilmahaagu waxay isticmaalaan ACCESS for ELLs buundooyinka imtixaanka marka ay go'aan ka gaadhayaan sida ugu wanaagsan ee wax loo baro ilmahaaga.

Buundooyinka imtixaanka sidoo kale waxay caawiyaan macalimiintu inay raad raacaan horumarka ilmahaaga wixii ah barashada Ingiriisiga akaademiga ah oo waxay ka caawisaa dugsiyada inay go'aan ka gaadhaan waxay tahay adeegyada taageerada luqadda Ingiriisiga si loo bixiyo. Waxaad isticmaali kartaa macluumaadka imtixaanka si aad ugu doodo ilmahaaga xaga dugsiga.



### ELL

Ardayga luqadda Ingiriisiga, ama ELL, waa arday haysta fursada si uu u helo tilmaamaha Ingiriisiga ah, marka lagu daro qaadashada fasalada. ELLs waxaa laga qaadaa imtixaan sanad kasta si loo caawiyo macalimiintu inay fahmaan xirfadahooda luqadda, laakiin waxaad leedahay xaqa inaad aqbasho ama diido taageerada luqadda.

### Ku wanaagsanaanta Luqadda

Heerka ku wanaagsanaanta Luqadda waa qiyaasta halka ardaydu ay ka marayaan nidaamka joogtaada ah ee dhisida xirfaddaha luqadda. Marka ardaydu gaadhaan heerarka ugu sareeya ee ku wanaagsanaanta, in dheeraad ah uma baahna adeegyada taageerada luqadda.

WIDA waxay ku jirtaa Xarunta Wisconsin ee Cilmi baadhida Waxbarashadda xaga Jaamacada Wisconsin-Madison.
© 2020 Guddida Regents ee Nidaamka Jaamacada Wisconsin, iyaddoo metalaysa WIDA.

## Qiimanaha ACCESS for ELLs



- ACCESS for ELLs waxaa lagu heli karaa warqad iyo qalin ama qaab kombuyuutar ku salaysan.
- Dugsiga barbaarinta ACCESS for ELLs waxa uu isticmaalaa sheekooyinka iyo hawlaha si ay ardayda dhalinta yar uga qayb qaataan.
- Beddelka ACCESS for ELLs waa imtixaanka kooxaha taageeradu waxay dooran karaan inay u isticmaalaan ardayda leh badanka ahmiyada naafanimada garaadka. Waxay bixisaa taageerada dheeraadka ah oo waxay siisaa ardayda fursaddo badan si looga jawaabo walxaha imtixaanka.

**Kala hadal macalimiinta waxa ku saabsan ACCESS for ELLs qorshayaasha imtixaamida xaga dugsiga ilmahaaga.**

Ilmahaagu uma baahna inuu barto ACCESS for ELLs. Imtixaanku waa fursada ardayda ay ku muujiyaan dhammaan qaababka ay fahmaan oo ay kula xidhiidhi karaan af Ingiriisi.

U diyaar garow maalinta imtixaanka addoo hubsanaya ilmahaagu inuu helo hurdo badan oo cuno quraacda.

Kala hadal macalimiinta ilmahaaga waxa ku saabsan marka aad heli doonto buundooyinka imtixaanka, sida dugsiga ilmahaagu u isticmaalo buundooyinkan iyo sida taageerada luqaddu isku beddesho marka ilmahaagu dhisayo xirfadaha luqadda Ingiriisiga.

---

## Su'aalaha aad waydiin karto

- Goorma ayaa ilmahaygu qaadan doonaa ACCESS for ELLs?
- Goormaan heli doonaa ilmahayga ACCESS for ELLs buundooyinkiisa imtixanka?
- Sidee buundooyinka imtixaanu u caawiyaan ilmahayga inuu sameeyo horumarka akaadeemiyada waxbarashadda Ingiriisiga
- Sideen go'aan ku gaadhaa marka ilmahaygu uu joojiyo helida taageerada luqadda?

WIDA™

WIDA waxay ku jirtaa Xarunta Wisconsin ee Cilmi baadhida Waxbarashadda xaga Jaamacada Wisconsin-Madison.
© 2020 Guddida Regents ee Nidaamka Jaamacada Wisconsin, iyaddoo metalaysa WIDA.